# Provider Access to a Community Equivalent

## Tijaabada jawaab celinteed

Ururadii hore-marka laga eego,  Barnaamijka tababarka waxa hadda loo yaqaan "**Helitaanka waxyaabaha bulshada lasiiyo u dhiganta**" ama "PACE." PACE waa hal qayb oo kamid ah sida loo bixiyo shuruudaha helitaanka shatiga waxbarashada iyo shatiyada shaqaalaynta dadka bixiyo waxbarashada aasaasiga ah. Doorashadani waa qayb ka mid ah ujeedooyinka lagu qeexay **Sharciga number 2556**. Wixii macluumaad dheerad ah, booqo halkan **Mashruuca wax uu kusaabsanyahy oo kooban.**

### Hirgelinta tijaabada

DCYF, oo ay la socoto kawarhaynta xanaanada ilmaha ee Washington, Machadka Imagine, and Voices of Tomorrow, ayaa sameeyeen tijaabo koobay  bilihii May iyo June 2021. Dhacdooyinka waxaa la marti galiyay Juun 2021 si wax badan looga barto waayo-aragnimada ku dhawaad 70 kaqeybgalayaash mashruucan. Jawaab-celinta dhacdooyinkan waxay saameyn doontaa horumarinta, dib-u-eegista, iyo mid u dhiganta bixinta PACE.

- Shan kulan oo jawaab celin ah ayaa khadka Zoom lagula yeeshay bixiyeyaasha waxbarashada hore (June 2021):
  - Kulamada jawaab-celinta ayaa lagu qabtay luuqadaha: English, Spanish, iyo Soomaali.
  - Qiyaastii 4 Kuhadasha English, 15 Spanish ah, iyo 12 Soomaali ah ayaa ka qayb galay fadhiyada jawaab celinta tooska ah.
- Kulanka jawaab-celinta  oo loogu talagalay tababar bixiyaasha oo lagu qabtay qadka Zoomka (June 2021):
  - Tababarayaasha kaso qayb galay fadhiga jawaab celinta tooska ah: 4 Spanish, 2 English, iyo 1 Somali ah.
  - Maamulku waxay ka qaybgaleen jawaab-celin si ay u siiso warbixin ku saabsan isku-dubbaridka Qorshaha.
- Ka qaybgalayaasha iyo tababarayaashu waxay dhamaystireen ra'yi ururin si ay u bixiyaan jawaab celin dheeraad ah.

### Jawaab celinta PACE

Jawaab-celinta waxaa soo abaabulau laguna aqoonsaday dhammaan fadhiyada shirku:

- Xeeladaha gaarsiinta
- Nuxurka Tababarka
- Dhaqangelinta Baahida
- Soo bandhiga barashada
- Tababaro dheerad ah lagu taageero.

#### Xeeladaha gaarsiinta

- Nuxurka tababarka iyo hababka wax-bariddu waxay sharftaa qaababka iyo dhaqamada kala duwan ee waxbarashada.
- Hawlaha tababarka laxiriira waxaana lagu fulin karaa isla shaqada  markiiba.
- Tababarku wuxuu bixiyaa kulamo xog-aruurina ah oo lala yeesho asxaabta-shaqada

kadhexeeyso.

- Isku-dubarid waxbarashada dadka waaweyn iyo indho-indheynta shaqada iyo codsiyada.

*"Waxay ahayd waayo-aragnimo aad u kobcaysa, Waxaan wax ka bartay hay'adaha ku hawlan taageeridda waxbarashad aass-aasiga ah ee carruurta dada yar. Isku soo duuduub, Waxaan bartay inay muhiim tahay inaan dhawro, isku dayo xeelado cusub, dib ugu laabto hababka waxbarida, oo aan ka hagaajiyo meeshii u baahan." – ka qaybgale Spanish ah.*

### Nuxurka Tababarka

- Waxa lagu dabaqi karaa kala duwanaanshaha qoysaska loo adeego.
- Waxaa ku jira fiidiyowyo waxtar leh oo fududeeyo waxbarashada.
- Aqoonta jirta oo kor loo qaado.
- Tababarku waa mid xiiso leh, xirfad sarena leh.
- Mawduucyadu waxay ku xiran yihiin jawiga waxbarashada aas-aasigaa.
- Muuqaalo badan ayaa loo baahan yahay.
- Ka qaybgalayaasha qaarkood ayaa waqti dheeriya oo u gaar ah geliyey barashada mawduucyadan.

### Sida loo dhaqangelinaa

- Tababaradu waxay u baahan karaan sharraxaad dheeraad ah.
- Bixiyeyaasha qaarkood ayaa laga yaabaa inay u baahdaan wakhti dheeraad ah si ay u dhamaystiraan PACE.
- ku Barashada shaqada waxay u baahan tahay in ladareemo inay ku xidhan tahay shaqada si aan loo dareemin inay tahay shaqo dheeraad ah.

*"Qoraal-laqaybiyey waxow ahaay mid waxtar leh maadaama aan awooday inaan raaco maadaama mararka qaarkood internetku aanu xoog lahayn duruusta qaarna idhaafayeen.. Waxaan awooday inaan lasocdo casharka, sababtoo ah waxaa haystay qoraalkii laqaybiyey." – Kaqaybgalayaasha English ah*

### Soo bandhigidda  Barashada

- Nuxurka waxa labartay waxow kuxiranyahay shaqada loogu talagalay.
- Activities can be incorporated into early learning program right away.
- Hawlaha waxa lagu dari karaa isla markiiba barnaamijka waxbarashada hore ee aas-aasiga ah
- Hab Isticmaalka casriga ah waxay ka dhigtaa barashada mid macno badan leh.
- Dadaalka iyo kucelcelinta ayaa xoojineysa barashada.

*"aragtideysa, tababarkan ayaa ahaa mid aad loogu guulaystay. Waxaa jira qalab badan oo lagula shaqeeyo carruurta, dadka baahida gaarkaa leh, Da' kasta. Iyo tababarkan, haddii DCYF ay hirgeliso, waxay u noqon lahayd tababar faa'iido badan u leh dhammaan bixiyeyaasha iyo dhammaan dadka la shaqeeya carruurt. kani waa tababar aad waxtar u leh; waa guul haddii ay hirgeliyaan." – Kaqaybgale Spanish ah*

### Tababar Dheeraad ah oo lagugu caawinaa

- Qoraallada tababbarku waaa kuwo waxtar u leh in la haysto.
- Tababarayaashu waxay jecel yihiin inay buugaagta tababarka ku arkaan nuxurka tababarka iyo talooyinka fududaynaa.
- sheeg boggaga Kuxiran Sharaxaada PPT ee bugaagta loo qaybiyey kaqaybgalayaasha.
- Su'alo iyo jawaabo, Isaragyo dheeraad ah waa in loo fidiyo kuwa u baahan ama rabo taageero

dheeraad aha.

*"Barnaamijku waa fursad weynWaxaan aad uga helay fikradda ah in waxbarashadaada habkan loo maro, Waxaa fiicnaan lahayd in wax  lagu daro agabka waxbarashada, laakiin habkani wuxuu fursad weyn u yahay dhammaan kuwa u shaqeeyo daryeelka carruurta." – Ka qaybgale Spanish ah*

## Talaabooyinka Xiga

Jawaab-celinta laga soo ururiyay dhammaan fursadaha wacyigelinta bulshada waxaa dib u eegi doona kooxda la-talinta iyo talo bixinta. Talooyinkan waxaa waxaa dib loogu eegi doonaa, sii socodka horomarinta iyo wax yaabaha la xiriira ee PACE.

## Macluumaad Dheeraad ah

Booqo halkaan  **DCYF PACE webpage** xogta ugu badan ee hadda jirta. si aad uga dhiibato fikirkaada ama aad u siiso talo bixin, kala xidhiidh Diana Stokes halkan **diana.stokes@dcyf.wa.gov**.